

# Qof kasta Wuxuu Gacan ka Gaysan karaa ka hortagga Dhaawacyada Qoryaha

## Ma ogtahay...?

Haddii aad haysato qoryo ama xitaa haddii aadan waligaa arag mid, waxaad weli gacan ka gaysan kartaa joojinta in carruurta iyo dadka kale waxyeello kasoo gaarto hubka. Waxaad door muhiim ah ku leedahay ka hortagga helitaanka aan sharciyaysnayn iyo waxyeelada dadka uga iman karta hubka, gaar ahaan carruurta.



In ka badan kala bar qoryaha yaalla guryaha carruurta joogta si badbaado leh looma kaydiyo.

82%

Ku dhawaad 82% dhalinyarada iskudila hubka waxaa door ka qaata qori uu leeyahay xubin ka tirsan goyska.

48,830

Sannadkii 2021, 48,830 qof ayaa u dhintay hub. Taasi waa in ka badan 130 qof maalin kasta.



1 ka mid ah 3-dii carruur ah ee Maraykanka ku nool waxay ku nool yihiin guri qori yaalla.

#1

Hubka ayaa hadda ah sababta ugu weyn ee sababta dhimashada carruurta iyo dhalinyarada ay da'doodu ka yar tahay 25 jir.

2x

Dhaawacyada aan dhimashada sababin ee hubka ayaa dhaca laba jibaar in ka badan dhimashada la xiriirta hubka.

In ka badan 1/3

Inta badan dhimashada a dhalata hubka ee dhalinyarada waa dil, laakiin in ka badan saddex-meelood meel dhimashada a xiriirta hubka ayaa ah isdilid.\*

55%



Markaad eegto da' kasta, in ka badan kala bar dhammaan dhimashada ka dhalata isdilka waxaa sababa hub

## MAXAAN u baahanahay inaan sameeyo si aan si badbaado leh ugu kaydsado hubkayga?

### Dadka leh Hubka

- Dhammaan hubka waa in rasasta laga saraa, lagu xiraa meel amaan ah iyo/ama quful dibadda ah (sida qufulka fiilada ah) mar kasta oo aan la isticmaalaynin.
- Waxa jira ikhtiyaaro kayd in badbaado leh oo u oggolaanaya in si degdeg ah loo helo qoryaha.

### Qof kasta

- Wada hadal ku saabsan kaydinta nabdoon Waxaa laga yaabaa in marka hore ay dareemaan qariib laakiin waxay muhiim u tahay sida mawduucyada kale ee badbaadada, sida xasaasiyadda iyo koofiyadaha baaskiilka.

## SABABTEEN u sameeyaa tani?

Waxaa jira sababo badan oo ay dadku u haystaan qoryaha laakiin dad badan ayaa doorta inay haystaan hub si ay u difaacan qoysaskooda. Badbaadada iyo kaydinta dhoorsan ee hubku waxay ka hortagtaa isdil, dil, dhaawac aan ula kac ahayn, iyo xatooyo. Taasi waa sababta ay mas'uuliyad qof walba uga saaran tahay inuu qaybtiisa ka qaato si loo hubiyo in hubka si ammaan ah loo kavidivo.

## SIDEEN ku baran karaa wax badan?

Macluumaad dheeri ah ayaa laga heli karaa iyadoo iskaan laga qaadanayo koodka QR ama aad booqanayso URL-ka hoos ku xusan:

<https://publichealth.jhu.edu/center-for-gun-violence-solutions/solutions/safe-and-secure-gun-storage>



\*Tani way ka duwan tahay dadka qaangaarka ah, kuwaas oo dhimashada ugu badan ee hubka ay tahay isdilid.